



Taariikda 19ka Nofeembar 2023

Dhammaan Dadka Degan Barton House,

Warbixinta fiidnimada Axadda

Waxaan rajaynayaa in sida ugu waanagsan aad u maarayseen hawlihiinii Sabtida iyo Axadda iyada oo aynu ognahay xaaladda jirta. Waxaan doonayaa in dhammaantiin aan idinku wargeliyo isbedelka lagu samyanayo dadka hoteelada qaarkood deggan.

Dadka la dejiyay Leonardo Hotel: Dadka la dejiyay Leonardo Hotelka badankooda waxa berri subax loo wareejin doonaa Holiday Inn. Saraakiisha Guryaha (Housing Officers) ayaa la soo xidhiidhi doona dadka uu go'aankani saamaynayo, waxayna kala hadli doonaan wakhtiga ay Holiday Inn u guuri doonaan. Haddii aad u baahantahay gaadiid ku qaada marka aad hoteelka kale u guurayso, waanu kuu diyaarinay. Waanu dareensan nahay in go'aankani uu culays iyo werwer keeni karo xaaladaha jira dartood, sidoo kale waanu garawsan nahay dulqaadkiina inta aanu isbedelkan samaynayno.

Hawsha baadhitaanka dhismaha (Survey work): Toddobaadka soosocda waxaanu u baahan nahay in aanu sii wadno baadhitaankii qiimaynta ahaa ee ku socday Barton House. Taa macnaheedu waxay tahay in aanu u baahan nahay in saddex guri (flats) aanu galno, waxaanan toos ula xidhiidhnay dadkii guryahaa deganaa. Waxa kale oo suurtoagal ah in dhawrka maalmood ee soosocda aanu u baahanno in guryo kale baadhitaan lau sameeyo – bal se guryaha geli mayno oo baadhitaan ku samayn mayno ilaa aan marka hore idinka toos idiin la soo xidhiidhno. Haddii aanan toos kuula soo xidhiidhin, taa macanheedu waa in aanan u baahnayn in gurigaaga aan galno, mana geli doono gurigaaga.

Maadaama ay shaqadani socoto, waxa laga yaabaa in shaqaalihii dhismaha ka shaqaynayay aad berri iyo maalmaha soosocda aad Barton House ku aragto. Fadlan ha ka shakiyin oo wax ka hor-imaad ah ha ku samaynin shaqaalaha dhismaha ka shaqaynaya, waayo waxay ka shaqaynayaan oo ay inaga caawinayaan sidii aynu arrintan wax uga qaban lahayn, haddii se dib-u-dhac uu shaqadooda ku yimaaddo waxay noqon doontaa in aynu jawaabo u weyno xaaladda dhismaha Barton House ka taagan.

Waxaanu filaynaa in shaqadani ay socota ilaa labada toddobaad ama saddexda toddobaad ee soosocda, sidaa daraadeed suurtoagal ma noqonayso in muddadaa aad gurigaagii dib u degto. Hase yeeshee, gurigaaga (flat) waxa aad booqan kartaa oo keliya maalintii si aad uga sooqaadato wixii alaab ah ee aad u baahantahay, laakiin waxaad u baahantahay in ilaalada (security) aad tusto kaadhka aad guriga ku gasho (residents' fob) si aad u xaqiijiso in aad kamid tahay dadka dhismaha deggan.

**Growth and
Regeneration**
Executive Office (CH)
PO Box 3399
Bristol
BS1 9NE

John Smith
Executive
Director

Website

www.bristol.gov.uk



Wakhtiyada ay shaqaaluhu heeganka yihiin toddobaadkan: Shaqaalahayagu waxay toddobaadkan heegan kuula yihiin caawimo iyo taageero:

- Barton House: Shaqaaluhu waxay diyaar u yihiin in ay bixiyaan wixii akhbaar ah ama taageero ah ee loo baahanyahay Sabtida iyo Axadda 9am ilaa 5pm (shaqaalaha sida joogta ah dhismaha uga hawlgala (caretaking staff) 7.30am ilaa 4pm), inkastoo laga yaabo in mararka qaarkood ay joogaan agagaarka dhismaha oo ay caawinayaan qaar ka mid ah dadka dhismaha deggan.
- Holiday Inn (Bond Street): Waxa laga yaabaa in shaqaaluhu ay marmar halkaa yimaaddaan. Haddii aad caawimo u baahantahay laakiin se qof shaqaalaha kamid ah aad arki weydo, fadlan wac 0800 694 0184.

Cuntada: Waxaanu idinka codsanaynaa in aydaan Barton House ku noqonin si aad cunto ugu soo karsataan. Cunto bilaash ah ayay heli doonaan dadka hoteelada la dejiyay. Dhammaan huteeladu waxay bixin doonaan quraac bilaash ah, 7am ilaa 10 am.

Qadada iyo cashada waxa bixinaya Holiday Inn oo keliya, laakiin dadka la dejiyay Clayton Hotel iyo Leonardo waxay iman karaan Holiday Inn si ay qado iyo casho bilaash ah u helaan.

- Qado - 12.30pm ilaa 5pm
- Casho - 6.30pm ilaa 9pm

Haddii aad cuntada wax su'aal ah ka qabto, la hadal Saraakiisha Guryaha (Housing Officers) ee hoteelkaaga jooga, ama email u dir barton.house@bristol.gov.uk ama wac khadka telefoonka caawimada ee bilaashka ah 0800 694 0184.

Tagsiyada ama Tagaasida : Adeegyada tagaasida oo bilaash ah ayaa loo diyaaray dadka meelaha lagama maarmaanka ah tagaya sida iskuulada, goobaha shaqada, dadka hoteelada kale degan ee Holiday Inn cuntada u soo doonaya, ballamaha cusbitaalada iyo dhakhaatiirta, ama dadka doonaya in ay Barton House alaab ka soo qaataan. Haddii aad tagsi u baahantahay, fadlan wac 0800 694 0184. Tagaasidu waa bilaash oo wax lacag ah lagaa qaadi mayo. Haddii wadayaasha tagaasidu ay lacag ku weydiiyaan, fadlan noo soo sheeg.

Farriimaha qoraalada ah ee lagu soo diro telefoonka gacanta (mobile) iyo email: Wixii war ah ee soo kordha waxaanu kuugu soo diri karnaa telefoonkaaga iyo email-kaaga. Fadlan hubi in aanu haysanno halka lagaala soo xidhiidhayo. Sarkaalka Guryaha (Housing Officer) eek u qaabilsan ayaad u sheegi kartaa halka lagaala soo xidhiidhayo, ama ku soo dir barton.house@bristol.gov.uk ama wac 0800 694 0184.

**Growth and
Regeneration**
Executive Office (CH)
PO Box 3399
Bristol
BS1 9NE

John Smith
Executive
Director

Website

www.bristol.gov.uk



Mar kale, dhammaantiin waxaan idiinka mahad celinayaa dulqaadkiina joogtada ah iyo garawshiyiina maadaama aanu ku dedaalayno xallinta xaaladdan ina soo wajahday. Fadlna nala soo xidhiidh haddii ay jiraan wax ay shaqaalahaygu kaa caawin karaan.

Mahadsanid,



John Smith

Interim Executive Director, Growth and Regeneration

**Growth and
Regeneration**
Executive Office (CH)
PO Box 3399
Bristol
BS1 9NE

John Smith
Executive
Director

Website

www.bristol.gov.uk



Taageero dheeraad ah

Waanu dareensan nahay in dhacdadani ay adiga iyo qoyskaaga xaalad adag idin gelisay, waxaan ku hawlan nahay sidii aan idiin siin lahayn lahayn taageerada aad u baahantihiin. Haddii aad u baahantahay taageero ama daryeel la xidhiidha caafimaadka maanka iyo fay-qabka dareenkaaga guud ahaaneed, waxa jira adeegyo caawimo kuula diyaar ah.

- Community Access Support Service waxay kaa caawin karaan in aad wax ka ogaato ama la xidhiidho dhammaan hay'adaha Bristol ee adeegyada siiya ama taageera bulshooyinka kala duwan ee magalada degan – www.cassbristol.org
- Samaritans waxaad ka heli kartaa caawimo ama taageero joogto ah maalin kasta 24 saacadood, 7 maalmood toddobaadkii ba – wac 116 123 wax lacag ah lagaa qaadi maayo.
- Shout 85258 waxay bixiyaan adeeg la xidhiidha farriimo qoraal ah oo qarsoodi ah (confidential text support), maalin kasta 24 saacadood, 7 maalmood toddobaadkii ba. Farriin qoraal ah u dir SHOUT 85258.
- **Xarumaha Qoyska (Family Hubs):** Xarunta Qoyska ee xaafaddaada ayaad ka heli kartaa wixii macluumaad iyo taageero ah ee adiga iyo qoyskaaga ku saabsan. Macluumaadka iyo taageeradaa waxa kamid ah hawlaha ay kooxo gaar ahi qabtaan, adeegyada caafimaadka iyo fay-qabka iyo caawimo la xidhiidha waalidka iyo waalidnimada. Xarunta Qoyska ee Barton House ugu dhow waa Wellspring Settlement, 43 Ducie Road, BS5 0AX. Waxay furanyihiin Isniin ilaa Khamiis, 9am ilaa 4.30pm, iyo Jimce 9am ilaa 1pm. Waxaad ka wici kartaa 0117 955 6971
- **Taageerada hooyooyinka haysta ilmo dhawr bilood jira iyo kuwa aan da'dii iskuulka gaadhin (Support for mothers with babies and infants):** Central Children's Centre waxay Holiday Inn (kuna yaalla Bond Street) ku qaban doonaan kulamo carruurta lagu ciyaarsiinayo oo ay waalidiintu ka qaybqaadan karaan. Wixii faahfaahin waxa la idiinku soo gudbin doonaa warbiximaha dambe.

Macluumaadka hoos ku qoran waxay faahfaahinayaan sida aad tagsi bilaash ah u dalban karto marka aad Holiday Inn tagayso.

- **Goobaha Soodhaweynta (Welcoming Spaces):** Goobaha Soodhaweyntuu weli magaalada dhammaanteed way ka furan yihiin. Goobahani qof kasta aya u furanyihiin, wax lacag ah lagaama qaadayo. Goobta kuugu dhow ayad isticmaali kartaa si aad dadka kale ugula kulanto, hawlaha aad ka qaybqaadato ama aad ka hesho wixii caawimo ah ee aad u baahnathay. Fadlna booqo degelka Golaha Deegaanka Bristol si aad u hesho Goobta Soodhaweynta ee xaafaddaada u dhow www.bristol.gov.uk/costofliving.